Forschungs Zentrum BAMF

Bundesamt für Migration und Flüchtlinge

Datenschutzbeauftragter BAMF:
Albert Wittke
Frankenstr. 210
90461 Nürnberg
Telefon: +49 911 943-0
datenschutzbeauftragter@bamf.bund.de

UNIVERSITÄT BIELEFELD
Fakultät für Soziologie

# Bayaanka ilaalinta xogta iyo qarsoonaanta buuxda ee tafaasiishaada

## Ujeedada aruurinta xogta

Waxaan kuula soo xiriiraynaa sababtoo ah Research Centre of the Federal Agency for Migration and Refugees (BAMF, Xarunta Cilmibaarista ee Wakaaladda Federaalka ee qaabilsan Soogalootiga iyo Qaxootida) oo ay la socoto University of Bielefeld (Jaamacadda Bielefeld) ayaa qabanaya daraasadda cilmiyeysan ee 'Dib u eegista: Xaaladaha Nolosha ee Gobolka Koowaad ee Qaxootida iyo Jarmalka'. Daraasaddaanu waxay gacan ka gaysan doontaa helista aqoon ku saabsan xaaladaha nolosha ee dadka Jarmalka ku yimid Barnaamijka Dib u dajinta Federaalka ama Barnaamijka Qaabilaadda Bili'aadantinimada ee Turkiga. Arintaanina waxay gacan ka gaysanaysaa baaritaanka nooca ka qaybgalka bulshada uu barnaamijkaanu ku guulaystay. Natiijooyinku waxay sidoo kale gacan ka gaysanayaan sii horumarinta barnaamijyada. Casuumaada daraasadaanu waxay u adeegaysaa danaha bulshada ee ah samaynta daraasad matalaad ah ayadoo la adeegsanaayo cilmibaaris cilmiyaysan oo bulshada ku saabsan. Ciwaanada iyo magacyada ayaa la wareejinayaa si waafaqsan Farqada 24a(1, 2) ee AZRG ayada oo laga soo wareejinayo Central Register of Foreign Nationals (Diiwaanka Dhexe ee Muwaadiniinta Ajaanibta ah) iyo hay'adaha qaabilsan soogalootida waxaana loo soo wareejinayaa BAMF Research Centre (BAMF-FZ) kaddibna waxaa loo sii wareejinayaa machadka cilmibaarista ee Ipsos, kaasoo samaynaya xog aruurinta asaga oo uga wakiil ah BAMF.

Ka qaybqaadashadaada daraasaddu waa **mutadawacnimo** waxayna ku qotontaa ogolaanshahaaga. **Wax faa'iido ama khasaare ah kuma helaysid ka qaybqaadashadaada iyo ka qaybqaadasho la'aantaada midna.** Haddii aad ka qaybqaadato aadno rabto inaadan ka jawaabin su'aalaha qaarkood sababo kuu gaar ah dartood, waxaad dooran kartaa xulashada 'Cannot / would not like to answer (Kama jawaabi karo / kama jawaabayo)'

## Xaquuqahaaga

Haddii aad caddayso oggolaanshahaaga xog aruurinta ee xog aruurintaan, waxaad ka laaban kartaa xili walba mustaqbalka adiga oo aan sabab ka bixin, wax cawaaqib ahna kaagama imaanayaan. Ilaa aad ka laabanayso, xog aruurintu waxay ahaanaysaa mid sharci ah. Waad iska diidi kartaa in daraasadda loo sii isticmaalo xogtaada gaarka ah (Xarafka 7 ee GDPA). Ma galaysid kharash aan ka ahayn kan boostada.

**Si aad oggolaanshahaaga uga laabato, fadlan ugu soo dir ka laabashadaada boostada ama iimaylka:**
Christian Kothe & Lea Mayer
Hay'ada Federaalka ee Socdaalka iyo Qaxootiga
Xarunta Cilmi baarista Socdaalka, Is-dhexgalka iyo Magangalyo doonka – Qaybta Cilmi baarista I
Frankenstr. 210, D-90461 Nürnberg
**Iimayl:** resettlement-forschung@bamf.bund.de

Ah 'Dib u eegista: Xaaladaha nolosha ee gobolka koowaad ee qaxootida iyo Jarmalka'daraasadda, BAMF-FZ iyo machadka cilmibaarista Ipsos GmbH ayaa si wadajir ah u qaadaya mas'uuliyadda ilaalinta xogta. Dhammaanba shuruudaha sharciga ee EU General Data Protection Regulation (GDPR Shuruucda Ilalainta Xogta Guud ee Midowga Yurub) iyo Federal Data Protection Act (Xeerka Ilaalinta Xogta ee Federaalka) ayaa la buuxinayaa.

**Marka aad ka codsato, hay'adaha ku lugta leh waxay ku siinayaan macluumaadka ku saabsan xogta xiriirka halkaas yaala, waxayna saxayaan ama tirtirayaan ama yaraynayaan adeegsigeeda marka aad ka codsato** (Xarafka 15 ff ee GDPR)**. Intaas waxaa dheer, waxaan jeclaan lahayn inaan ku ogaysiino xaquuqaha sharciga ah ee qaadashada racfaanka hay'adda ku shaqada leh** (Federal Commissioner for Data Protection and the Freedom of Information (BfDI Guddiga Ilaalinta Xogta iyo Xoriyadda Macluumaadka ee Federaalka))**.**

## Qarsoonaanta xogta xog aruurinta iyo ilaalinta xogta

Qiimayn shakhsi gaar ah loola dan leeyahay marna lama samaynayo. Xogta waxaa loo qiimaynayaa qaab qarsoodi ah kaliya waxaana **si gaar ah loogu tala galay ujeedooyin cilmi ku slaaysan**. Tafaasiishaada su'aalaha la socota waxaa kaliya lagu kaydinayaa si waafaqsan lambarka koodhka, si ka duwan magacaaga iyo tafaasiisha xiriirkaaga. Lambarka koodhka waxaa horey u samaysay BAMF-FZ waxayna u gudbisay Ipsos ayada oo ay la socdaan magacaaga iyo ciwaankaaga.

Natiijooyinka xog aruurinta waa **la qiimaynayaa waaana lasoo bandhigayaa ayada oo aan lahayn magaca iyo tafaasiisha xiriirka**. Arintaan waxay la micno tahay: Natiijooyinka lasoo daabacayo, majiro qof garan kara qofka tafaasiishaan bixiyay.

Marka daraasadda la dhammaystiro, xog aruurin qarsoodi ah ayaa lagu kaydin doonaa xarunta cilmibaarista BAMF (BAMF-FDZ) si waafaqsan hanaanka wanaagsan ee cilmiyaysan, waxaana loo bixinayaa si waafaqsan ujeedooyinka cilmibaarista iyo waxbarashada. Majirto xog loo isticmaali karo in adiga shakhsi ahaan laguugu garto oo loo diri doono dhinac saddexaad.

Qaybta danbe ee bayaanka, waxaan ku sharaxaynaa ogolaanshaha kale ee aad ku bixin karto xog aruurinta, waxaana kugu tusaynaa wadada xogtaadu marayso laga bilaabo wareysiga ilaa shaxda natiijooyinka qarsoodiga ah ee dhammaystiran.

Ipsos

Datenschutzbeauftragter Ipsos:
Sandro Matzke
Sachsenstraße 6
20097 Hamburg
Telefon: +49 89 99600 1850
dpo.germany@ipsos.com



Kofinanziert von der Europäischen Union

Forschungs Zentrum BAMF

Bundesamt für Migration und Flüchtlinge

Datenschutzbeauftragter BAMF:
Albert Wittke
Frankenstr. 210
90461 Nürnberg
Telefon: +49 911 943-0
datenschutzbeauftragter@bamf.bund.de

UNIVERSITÄT BIELEFELD
Fakultät für Soziologie

## Oggolaansho gaar u ah isugaynta Xogta ka imaanaysa Central Register of Foreign Nationals (AZR)

Cilmibaarista darteed, waxaa intaas dheer oo aan jeclaan lahayn inaan xogtaada xog aruurinta u gayno xogtaada rasmiga ah ee diiwaanka. Xogta waxaa kujira macluumaad adiga kugu saabsan kaasoo ay BAMF iyo wakaaladda soogalootigu kaydiyeen ilaa iyo intii aad Jarmalka soo gashay. Xogta waxaa lagu kaydiyay Central Register of Foreign Nationals (AZR). Xogtaan dheeraadka ah gudaheeda, waxaan awoodnaa, tusaale ahaan, inaan baarno ogolaanshaha degenaanshaha ka qaybqaadanaya horumarinta xaaladaha nolosha dadka ku yimid Barnaamijka Dib u dajinta Federaalka ama Barnaamijka Qaabilaadda Bili'aadantinimada ee Turkiga.

Sharcigu wuxuu kaliya oo isugaynta macluumaadka ka imaanaya labadaba AZR iyo xog aruurinta oggolaanayaa haddii ogolaanshahaaga la helo, kaasoo aan jecelnahay inaan ku weydiisanno inta xog aruurintu socoto. Waxay isugayntu si gaar ah uga dhacaysaa BAMF-FZ. Xogta ka imaanaysa AZR waxay ku saabsan tahay macluumaadka khuseeya sharciga soogalootida. Waxaa kamid ah macluumaad ku saabsan soo galistaadii waddanka, xaaladaada iska warbixinta iyo xaalada degenaanshaha ilaa iyo intii aad soo gashay, shuruudaha degenaanshaha, nooca baasaboorkaaga iyo xaalada magangalyada ee suurtagalka ah. Intaas waxaa dheer, dhammaanba macluumaadka aad nagu siiso xog aruurintaan waa la isticmaalayaa. **Oggolaanshahaanu sidoo kale waa mutadawacnimo – wax faa'iido ama khasaaro ah kaama soo gagarayaan haddii aad ogolaansho bixiso iyo hadii aadan bixinba.**

Haddii ada ogolaato isugaynta xogta, Ispos waxay lambarka koodhkaaga u gudbinaysaa BAMF-FZ, taasoo BAMF-FZ u saamaxaysa inay garato xogtaada kujirta AZR. Xogta ka imaanaysa xog aruurinta iyo AZR ayaa kaddibna lagu xirayaa BAMF-FZ ayada oo la isticmaalayo lambarka koodhka, laakiin kuma jirayaan magacaaga iyo tafaasiisha xiriirkaagu. Waxay arintaanu sidoo kale ka dhici doontaa xogta AZR ee 2025 iyo 2026. Kaliya xog qarsoon oo la diyaariyay ayada oo aan lambarka koodhka la isticmaalayn ayaa loo isticmaalayaan hanaanka intaas ka danbeeya.

## Ogolaansho gaar ah oo wax looga qabanayo kaydinta dib ula soo xiriirita

Waxaan qorshaynaynaa xog aruurin dheeraad ah oo ku saabsan shakhsiyaadka Jarmalka ku yimid Barnaamijka Dib u dajinta Federaalka ama Barnaamijka Qaabilaadda Bili'aadanimada ee Turkiga; waxaan jeclaan lahayn inaan mar kale kula soo xiriirno arin tan lamid ah. Xogtaada waxaa kaliya oo lagu kaydin doonaa BAMF-FZ si mar labaad laguula soo xiriiro haddii xog aruurinta ku ogolaato. Haddii aad si dheeraad ah u muujiso iimaylkaaga iyo lambarkaaga taleefoonka, sidoo kale waa la kaydinayaa waxaana loo isticmaalayaa fududaynta sidii laguula soo xiriiri lahaa.

Haddii aad ogolaato in dib laguula soo xiriiro, Ipos waxay BAMF-FZ u diraysaa lambarka koodhkaaga oo ay la socoto tafaasiisha xiriirka ee dheeraadka ah (ciwaanada la cusboonaysiiyay, lambarka teleefoonka ama iimaylka). Tafaasiisha xiriirka marna kuma xirna tafaasiishaada xog aruurinta, waxaana loo kaydinayaa si ka gaar ah xogta loo adeegsanayo falanqaynta.

Haddii aad ogolaato in mar labaad lagula soo xiriiro, Ipsos waxay jawaabahaaga xog aruurinta oo xog dheeraad ah oo uu la socdo lambarkaaga koodhka u diraysaa BAMF-FZ. Arintaan waxay soo koobaysaa jawaabahaaga haddii ay jirto xog aruurin kale inta wakhtigaan lagu jiro. BAMF-FZ waxay jawaabahaan u kaydinaysaa si gaar ka ah tafaasiisha xiriirka iyo xogta taasoo si cilmiyeysan loo qiimaynayo.

**Ka qaybqaadashada xog aruurinada kale haddana waa mutadawacnimo mana lahan wax waajibaadyo ah.** Waad ka laaban kartaa waadna joojin kartaa oggolaanshahaaga xili walba. Islamarkiiba ciwaankaaga waa la tirtirayaa. Waxaan u hogaansannahay shuruucda ilaalinta xogta waxaana xaqiijinaynaa inaan wax ka qabanno tafaasiisha loo gudbin dhinac sadexaad. Haddii aysan jirin xog aruurin tan daba socota, tafaasiisha ciwaankaaga iyo lambarka koodhkaaga waxaa la tirtirayaa 5 sanno kaddib ugu danbayntii.

Haddii aadan oggolaansho bixin, tafaasiisha ciwaankaaga jira waxaa la tirtirayaa marka xog aruurinta la dhammaystiro.

**Maxaa ku dhacaya tafaasiishaada?**

1. Tafaasiishaada su'aalaha la socota waxaa kaliya lagu kaydinayaa si waafaqsan lambarka koodhka, si ka duwan magacaaga iyo tafaasiisha xiriirkaaga.
2. Kaliya haddii aad ogolaato in macluumaadka loo gayn karo xogta diiwaanka kujirta ayaa sidaas la samayn karaa ayada oo la isticmaalayo lambarka koodhka.
3. Dhammaanba jawaabaha ayaa la qiimayn doonaa ayada oo aysan la socon magacyo, tafaasiisha xiriirka ama lambarada koodhka. Tusaale ahaan, dhammaanba jawaabaha ku saabsan xaaladaha qoyska ayaa la tirin doonaa kaddibna waxaa la xisaabin doonaa boqoleyda soo harta.
4. Natiijooyinka guud iyo natiijooyinka kooxaha hoose (sida raga iyo dumarka) ayaa lagu soo bandhigi doonaa qaan shax ahaan ah. Tafaasiisha shakhsiyaadka gaarka u ah laguma garan karo natiijada shaxda kujirta.
5. Magacaaga iyo tafaasiisha xiriirkaaga waaa mar walba loo kaydin doonaa si gaar ka ah xogta su'aalaha. Marka daraasadda la dhammeystiro, xogtaan BAMF-FZ waa la tirtirayaa. Magacaaga iyo tafaasiishaada xiriirka waxaa kaydinaysa BAMF-FZ kaligeed haddii aad ogolaato kaydinta iyo gudbinta ciwaankaaga ayada oo ujeedadu tahay waraysiyada danbe oo soo noqonaya.
6. Ipsos waxay u xilsaaraysaa shaqaale diyaariya dirista boostada laguu soo dirayo iyo tarjumaadda jawaabahaaga.

Waxaan jeclaan lahayn inaan kaaga mahadcelino wadashaqayntaada inaad kalsooni nagu siiso shaqadeena!

Ipsos

Datenschutzbeauftragter Ipsos:
Sandro Matzke
Sachsenstraße 6
20097 Hamburg
Telefon: +49 89 99600 1850
dpo.germany@ipsos.com



Kofinanziert von der Europäischen Union